

Maqnaanshaha ardayda wuxuu noqon karaa qaybaha soo-socda:

- 1 Jirro ama dhaawac**
- 2 Googoysnimo**
Ilmahaaga oo ka maqnaada dugsiiga adoon ogayn
- 3 Diididda dugsiiga**
Ilmahaaga oo aan doonayn inuu tago dugsiiga, in kastoo aad isku dayday inaad gayso
- 4 Ka-haridda dugsiiga**
Ilmahaaga oo aan tegayn dugsiiga ayadoo uu haysto ogolaanshahaaga. Tusaale ahaan, fasaxyada qoyska, ilmo-haynta, ka-caawinta waalidka guriga, ka-shaqaynta ganacsiga qoyska.

Waalidiinta iyo daryeelayaashuba waa shakhsiyaadka ugu xoogga badan xagga saamaynta akhlaaqda dadka dhallinyarada ah.

Waxaad kaalin muhiim ah ka cayaartaa taageerada ilmahaaga inuu ammaan ku jiro uuna sameeyo doorasho uu ka warqabo.

MA FIICNA INAAD ISKA MAQNAATO

Wixii macluumaad dheeraad ah, dugsiyadu waxay kala xirriiri karaan xafiiskooda gobolka ee DE&T



www.sofweb.vic.edu.au/wellbeing/welfare/attend.htm



Department of
Education & Training

MA FIICNA INAAD ISKA MAQNAATO

Macluumaadka Imaanshaha oo loogu talagalay Waalidiinta iyo Daryeelayaasha

Dugsiigu wuxuu ku siinayaa mustaqbal fiican



Knowledge & Skills
Building a Future



Somali
Victoria
The Place To Be

Maxay yihiim waajibaadkayga waalid ahaan ama daryeele ahaan?

Hubi inuu ilmahaagu:

- yimaado dugsiga maalmaha dugsiga Oo Dhan
- maalin walba waqtiga ku yimaado

Hubi inaad:

- dugsiga siiso caddaynta sababta haddii ilmahaagu uu ka maqnaado dugsiga
- La soo xirriro dugsiga haddii uusan ilmahaagu doonayn inuu aado dugsiga
- samayso ballamaha dkakhtarka iyo kuwa ilkaha saacadaha aan dugsigu jirin
- samayso waqtiyada adeegyada shakhsiga ah ee wiilkaaga ama gabadhaada ama u-damaashaadka maalmaha dhalashada saacadaha aan dugsigu jirin
- u-ogolaanin ilmahaaga inuu guriga iska joogo sababo aan macno lahayn.

Imaanshaha joogtada ah ee dugsiga ma muhiimbaa?

- Haa – laga bilaabo maalinta kowaad. Haddii ilmahaagu gafo xirfadaha muhiimka ah ee dugsiga hoose waxay la kulmi doonaan dhibaatooyin waayo-aragnimo intay wax barayaan
- Imaanshaha joogtada ah waa lagama maarmaan si loo hubiyo inaan waxbarashadii khalkhal gelin. Waxbarashada joogtada ah waxay keentaa dhismaha asaasiga ah ee mustaqbalka
- Dugsiyadu waxay carruurta ku caawiyaan inay yeeshaan xirfadaha bulshadeed, sida samaysiga saaxiibtinimada, koox-u-shaqaynta, xirfadaha wada-xirriirka iyo qabka nafta ee caafimaadka leh.

Maxaan ka fili karaa dugsiga?

- La socodka imaanshaha ardayga ee dugsiga iyo qiimaynta horumarka oo toddobaadkii ku salaysan
- Xeeladaha waalid ahaan kugu caawin kara inaad ilmahaaga ku dhiirigeliso inuu aado dugsiga.

Maxaan caawimaad heli karaa haddii ilmahaygu diido inuu aado dugsiga ama uu googynayo?

Dugsigu wuxuu ku siin karaa kala-doorashada teegeerooyin dhowr ah:

- bare ula shaqeeya ardayga sidii kaalin taageerid ama talo-siin ah
- isu-duwaha daryeelka ardayda dugsiga oo la shaqeeya ardayga
- dugsigu wuxuu ku siin karaa qof talo-siia ilmahaaga
- dugsigu wuxuu bixin karaa booqashooyin guri si loo ogaado dhibaataada loogana caawiyo xalkeeda waalidka
- dugsigu wuxuu ogaan karaa sababaha uu ilmahaagu u doonayn inuu aado dugsiga
- dugsigu wuxuu ku siin karaa xeeladaha kugu caawin kara inaad ku dhiirigeliso ilmahaaga inuu aado dugsiga
- dugsigu wuxuu samayn karaa barnaamij dhiirigelin ah si loo dhiirigeliyo ilmahaaga inuu yimaado dugsiga
- dugsigu wuxuu ku siin karaa xirriirka lala yeesho hay'adaha bulshada.

Ma inaan ilmahayga u diraa dugsiga maalin kasta?

Haa, haddii:

- uusan ilmahaagu xanuunsanayn ama jiranayn si uu aado dugsiga
- aysan ilmahaaga haynin cudurka infakshanka
- uusan maamulaha la siin sabab macquul ama suurtagal ah ee maqnaanshaha.

Ilmahayga ma waxaa loo qorayaa maqnaansho haddii uu samaynayo TAFE, VET ama bartnaamij bulshadeed?

- Maya – haddiiba ay tahay barnaamij ka mid ah dugsiga.

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu ka qaybgalo cayaaraha?

- Maya – haddiiba ay tahay barnaamij ka mid ah dugsiga.

Ma u baahanahay inaan dugsiga u sheego haddii ilmahaygu maqnaado?

- Haa – waa mid u wanaagsan ladnaanta ilmahaaga, Wasaaradda Waxbarashada & Tababarka (DE&T) waxay leedahay siyaasadda imaanshaha, bareyaasha iyo dugsiyadana waxaa looga baahan yahay inay la socdaan maqnaanshaha ardayda.

Bal aan doorano Faadumo aanna dhageysano maalinteedii waxay kala kulantay dugsiga.

